

JAMHUURIYADDA		SOMALILAND
FAAFINTA RASMIGA AH		
SOMALILAND REPUBLIC OFFICIAL GAZETTE		النشرة الرسمية لجمهورية صوماليلاند
XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA JSL, HARGEYSA <i>E-mail: Faafintagaryaqaanka@gmail.com</i>		
Sanadka: 7aad	Cadadka: 8aad ee August	Taariikh: 01/09/2018
QIIMAHA CADADKA: SL. Sh.		
RUKUNKA (Subscription):		
<i>QIIMAHA FAAFINTA AAN DAWLIGA AHAYN ee Qaybta Shanaad: Sadarkii Boggii kastaaba SL. Sh.</i>		

TUSMADA CADADKA

<p><u>QAYBTA KOWAAD:</u> XEERARKA BAARLAMAANKA, HESHIISYADA CAALAMIGA AH IYO MIISAANIYADDA QARANKA:</p> <ol style="list-style-type: none">1) Dhaqan-galka Xeerka Shirkadaha Somaliland Xeer Lr. 80/2018 (Cadad Gaar ah)2) Dhaqan-galka Xeerka Maareynta Deegaanka Xeer Lr. 79/2018 (Cadad Gaar ah)3) Dhaqan-galka Xeerka Waxbarashada Qaranka Xeer Lr. 77/2018 (Cadad Gaar ah)4) Dhaqan-galka Xeerka Kufsiga iyo Xadgudubyada Jinsiga Xeer Lr. 78/2018 (Cadad Gaar ah) <p><u>QAYBTA LABAAD:</u> XEER MADAXWEYNE:</p> <ol style="list-style-type: none">5) <u>Xeer Madaxweyne</u> Madax-bannaanida Xafiiska Xisaabiyaha Guud6) <u>Wareegto Madaxweyne</u> Magacaabid7) <u>Wareegto Madaxweyne</u> Dib-u-habaynta Ciidanka Ilaalada Cashuuraha	<p>130</p> <p>132</p>
--	-------------------------------------

(Turbataariyada)

8) **Wareegto Madaxweyne**

La-wareegidda Hantida Dawladda ee Haamaha
Berbera, Amniga iyo Baarkinka Madaarka
Caalamiga ah ee cigaal

9) **Wareegto Madaxweyne**

Cashuur-Dhaafka



**QAYBTA SADEXAAD: XEER NIDAAMIYAYAASHA
WASAARADAH, XEERARKA GOLAYAASHA
DEEGAANKA, NATIJOOYINKA DOORASHOOYINKA &
BARNAAMIJYADA DAWLADA:**

10) SOOMA BIXIN

**QAYBTA AFRAAD: GO'AANADA MAAMUL &
QARAARADA:**

11) SOOMA BIXIN


**QAYBTA SHANAAD: AMARADA, OGEYSIISYADA &
QANDARAASYADA DOWLADA:**

- | | |
|--|-----|
| 12) Diiwaan Gelin Shirikada Basra Trading Com | 141 |
| <u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u> | |
| 13) Diiwaan Gelin Shirikada Tomoon Ltd | 142 |
| <u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u> | |
| 14) Diiwaan Gelin Shirikada Gl General Trading | |
| <u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u> | |
| 15) Diiwaan Gelin Shirikada Rexpray Payment Getway
Company | 144 |
| <u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u> | 145 |
| 16) Diiwaan Gelin Shirikada Fair Logistics and
Procurement Company | 147 |
| <u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u> | |
| 17) Diiwaan Gelin Shirikada Mobile & Tablets
Electronics Capacity Pvt Ltd | 148 |
| <u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u> | |
| 18) Diiwaan Gelin Shirikada Red sea Logistics and
Procurement Company | 150 |
| <u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u> | |

19) Diiwaan Gelin Shirikada Dansoor General Trading Company <u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>	151
20) Diiwaan Gelin Shirikada Future Accounting & Business Advisors <u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>	152
21) Diiwaan Gelin Shirikada Stepwise Traiding Services <u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>	154
22) Diiwaan Gelin Shirikada Safeway Security Company <u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>	155
23) Diiwaan Gelin Shirikada Nasrulah Car Decoration and Spare Parts <u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>	157
24) Diiwaan Gelin Shirikada Guuleed Material Building <u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>	158
25) Diiwaan Gelin Shirikada Somaliland Natural Resources Ltd <u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>	160
26) Diiwaan Gelin Shirikada Solar Farm Corporation <u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>	161
27) Diiwaan Gelin Shirikada Barakale Gemstone <u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>	162
28) Diiwaan Gelin Shirikada Hasan Waaqle Logistic and Procurement <u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>	164
29) Diiwaan Gelin Shirikada Dalsan Farms Company <u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>	165
30) Diiwaan Gelin Shirikada Burco Aluminuim Center <u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>	165
31) Diiwaan Gelin Shirikada Baynax Medical Apparatus & Fitness <u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>	167
32) Diiwaan Gelin Shirikada Global Reach Training Worldwide <u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>	170
33) Diiwaan Gelin Shirikada Saqaaf Trading <u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>	171
34) Diiwaan Gelin Shirikada Lamiis Pharmaceutical Whole <u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>	172
35) Diiwaan Gelin Shirikada Somaliland Hanf Run Development Co	



<p><u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u> 36) Diiwaan Gelin Shirikada Al-Alim Logistics and Procurement</p>	<p>174</p>
<p><u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u> 37) Diiwaan Gelin Shirikada Alamgan Trading Company</p>	<p>175</p>
<p><u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u> 38) Diiwaan Gelin Shirikada Shire General Trading</p>	<p>177</p>
<p><u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u> 39) Diiwaan Gelin Xafiis wakil Shirkada Nordic Horn of Africa Appportunity Fund</p>	<p>178</p>
<p><u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u> 40) Diiwaan Gelin Shirikada Kumbit Global Limited</p>	<p>180</p>



QAYBTA LABAAD:

XEER MADAXWEYNE:



JAMHUURIYADDA



SOMALILAND

Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/249-150/062018

Taar: 21/06/2018

Xeer Madaxweyne Lr. 03/062018

Madax-bannaanida Xafiiska Xisaabiyaha Guud

Markaan Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markaan Arkay: Qodobka 18aad, faqradiisa 1aad iyo 2aad. Qodobka 65aad faqradiisa 2aad ee xeerka kala-xadeynta Nidaamka Xukuumada iyo Hay'adaha Madaxa bannaan, xeer Lr. 71/2015;

Markaan Arkay: Qodobka 7aad, faqradiisa 5aad ee Xeer-nidaamiyaha Dhismaha Wasaaradaha iyo Hay'adaha Xukuumadda, Xeer Lr.01/2018;

Markaan Arkay: Qodobka 20aad ee Xeerka Maamulka Maaliyada iyo Xisaabaadka Qaranka;

Markaan Tix-galiyay Muhiimadda ay dhismaha Qaranka u leedahay Madax-

bannaanaynta Xafiiska Xisaabiyaha
Guud;

Waxaan Go'aamiyey;



Aniga oo ka duulaya Qodobada sharci ee kor ku xusan, in laga bilaabo taariikhda maanta 21/06/2018 uu xafiiska Xisaabiyaha Guud ee Dawladdu u madaxbannaan yahay gudashada waajibaadkiisa shaqo (Maamul iyo Maaliyadba), isla markaana waxa uu yeelan doonaa miisaanid u gaar ah.

Xafiiska Xisaabiyaha Guud ee Dawladdu waxa xidhiidh-wada-shaqayneed (Line Ministry) la yeelanayaa Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda.

Allaa Mahad Leh

Muuse Biixi Cabdi
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

JAMHUURIYADDA  **SOMALILAND**

Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-178/082018

Taar: 11/08/ 2018

Wareegto Madaxweyne

**La-wareegidda Hantida Dawladda ee Haamaha Berbera,
Amniga iyo Baarkinka Madaarka Caadiga ah ee Cigaal**

Markaan Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markaan Arkay: Qodobka 14aad xubintusa 1aad iyo Qodobka 54aad xubintusa 1aad Dastuurka;

Markaan Arkay: Qodobka 3aad (2) (kh), 32 (2) (g), iyo 33 (2) (b) ee Xeerka Hay'adda Duulista Madaniga ah ee Xeer Lr.70/2017;

Markaan Arkay: Qodobka 6aad ee Xeerka Takaalifta Amniga Madaarada ee Xeer Lr. 61/2013;

Markaan Garwaaqsaday: In daryeelka iyo ilaalinta hantida guud ay tahay waajib saran xukuumadda, hantidaas oo hadii loo baahdo lagu wareejin karo kali ah, si sharciga waafaqsan, sida ku cad qodobka 12aad ee Dastuurka dalka;

Markaan Xaqiiqsaday: Mihiimadda ay leedahay la soo noqoshada hantida dawladda, oo il-duuf sharci ku jiro habka loo wareejiyay, maadaama aanu jirin Xeerka Iskaashiga Dawladda iyo Ganacsiga Gaarka ah (PPP Act);

Markaan Arkay: Mihiimadda ay leedahay in dawladdu la soo noqoto hanti-ahaan iyo maamul ahaanba Haamaha Shidaalka Berbera, Adeegga Amniga Madaarka Caalamiga ah ee cigaal, iyo Baarkinka Madaarka Cigaal, sababo amni iyo dhaqaale awgeed;


Markaan Xaqiiqsaday: In sii wadidda heshiisyadii lagu wareejiyey adeegyada bulshada ee ay xukuumaddu ka masuulka ahayd aanay ku jirin danta guud ee qaranka, isla markaana ay ka hor imanayso waajibka xukuumadda ka saran ilaalinta hantida Qaranka iyo uga faa'iidaynta dant guud;

Markaan Helay: Talo soo jeedinta guddida dhaqaalaha iyo horumarinta ee Heer Qaran iyo talo bixintii sharci ee heshiisyadii dhex-maray Xukuumadda iyo shirkadaha BOG, SRM iyo EPASS;

Waxaan Go'aamiyey;

- 1) In la buriyay heshiisyadii lagu wareejiyay adeegyada: Haamaha Shidaalka (BOG), Adeega Amniga Madaarada (SRM), iyo Adeegga Baarkinka Madaarka Cigaal (EPASS).
- 2) In xukuumaddu ay gabi ahaanba ula soo noqotay si sharciga waafaqsan maamulkii, gacan-ku-hayntii, adeegii iyo Qalabkii Haamaha shidaalka ee Berbera, Amniga Madaarka Caalimiga ah ee Cigaal, iyo Adeegga Baarkinka Madaarka Caalamiga ah ee Cigaal ee ay hayeen shirkadaha kala ah; BOG, SRM iyo APASS.
- 3) In wasaaradda Ganacsiga, Warshadaha iyo Dalxiiska, Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda, Hanti-dhawraha Guud ee Qaranka, Xisaabiyaha Guud ee Qaranka iyo Hay'adda Duulista Hawadu ay keenaan qiimaynta dhabta ah ee dhaqaalaha ay shirkadaha BOG, SRM iyo EPASS ku maalgaliyeen Haamaha Shidaalka Berbera, Amniga Madaarkada Caalimiga ah ee Cigaal iyo Baarkinka Madaarka, soona xaqiijiyaan dhaqaalaha ay ka heleen.

- 4) In Wasaaradaha iyo Hay'adaha ay khusaysaa ka gutaan waajibkooda sharci ee fulinta qodobbadankor ku xusan.
- 5) In shaqaalihii ka hawl-galayey adeegyadani ay shaqadooda u sii wadanayaan si caadi ah.



Allaa Mahad Leh

Muuse Biixi Cabdi
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

JAMHUURIYADDA  **SOMALILAND**

Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-179/082018

Taar: 13/08/ 2018

Wareegto Madaxweyne

Magacaabid

Markaan Arkay: Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland, Qodobka 90aad;

Markaan Arkay: Aqoontooda, Kartidooda iyo Waaya-aragnimadooda;

Markaan ku Qancay: In ay Hanan Karaan Masuuliyadda ka Dhalanaysa Xilalkan;

Markaan Sameeyey: La-tashi;

Waxaan Go'aamiyey;



1. In laga bilaabo taariikhda maanta aan xilalkan u magacaabo masuuliyiintan;

Tir	Magaaca	Xilka
1.	Baashe Cawil Cumar	Wakiilka Somaliland ee Dalka Kenya
2.	Xasan Hirad Yaasiin	Wakiilka Somaliland ee Dalka Imaaraadka Carabta
3.	Bashiir Sheekh Cumar Good	Wakiilka Somaliland ee Dalka Maraykanka
4.	Cabdillaahi Cabdi Cali (Dhakaar)	Ergayga Gaarka ah ee Somaliland u qaabilsan urur Goboleedka Horumarinta iyo xidhiidhka Bulshada Bariga Afrika (EAC)
5.	Xasan Axmed Ibraahin (Embassy)	Maareeyaha Haamaha Kaydka Shidaalka Qaranka

Waxaan uga mahadcelinayaa muddadii uu hayey xilka Qaranka Wakiilkii hore ee Somaliland u fadhiyey Dalka Maraykanka Mudane, Rashiid Maxamed Nuur (Gaaruf).

Allaa Mahad Leh

Muuse Biixi Cabdi
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

JAMHUURIYADDA  **SOMALILAND**

Xafiiska Madaxweynaha



Wareegto Madaxweyne

Dib-u-habaynta Ciidanka Ilaalada Cashuuraha **(Turbataariyada)**

Markaan Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markaan Arkay: Ahmiyadda Ciidanka Ilaalada Cashuuruhu u leeyihiin Kobcinta Dhaqaalaha iyo Dar-dar-galinta Dhakhli Uruurinta Dalka;

Markaan Xaqiiqsaday: Muhiimadda Dib-u-habynta Ciidanka Ilaalada Cashuuruhu u leeyihiin Qaranka;

Markaan Helay: Talo-soo-jeedinta Wasaaradaha iyo Hay'adaha Dawladda ee ay khusayso;

Waxaan Go'aamiyey;

- 1) In laga bilaabo taariikhda manta dib u habayn lagu sameeyo Ciidanka Ilaalada Cashuuraha (Turbataariyada), kuwaas oo noqon doona qayb ka tirsan Ciidanka Booliska Jamhuuriyadda Somaliland, isla markaana hoos tagi doona talista guud ee Ciidanka Booliska.
- 2) In Taliyaha Ciidanka Boolisku isku-bedel ku sameeyo ciidanka ilaalada Cashuuraha lixdii biloodka hal mar, isla markaana la siiyo tababar ku saabsan nidaamka ilaalinta cashuuraha, tacriifadaha badeecadaha, wada-shaqaynta maamulka goobta cashuur-qabashada iyo asluubta la-dhaqanka cashuur bixiyaha.

- 3) In ciidanka ilaalada cashuuraha laga dhigo kuwo leh ugu yaraan aqoon dugsi sare iyo ammaano dhab ah, laguna soo xulo karti iyo hufnaan.



Allaa Mahad Leh

Muuse Biixi Cabdi
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

JAMHUURIYADDA  **SOMALILAND**

Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-186/082018

Taar: 27/08/ 2018

Wareegto Madaxweyne

Cashuur-Dhaafka

Markaan Arkay: qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland

Markaan Arkay: Qodobka 14aad xubintiisa 2aad ee dastuurka Jamhuuriyada Somaliland:

Markaan Arkay: Xeerka Kastamada Somaliland xeer Lr. 73/2016 iyo Xeerka cashuuraha Barriga Somaliland Xeer Lr 72/2016:

Markaan Arkay: In cashuuruhu yihiin if-dhabarta dhaqalaha qaranku ku dhisan yahay, kuwaasi oo fure u ah gudashada waajibaadka xukuumadda, fulinta adeegyada horumarineed iyo sugidda amniga Qaranka;

Markaan Arkay: Xeerka Dalka ee loogu talo-galay in lagu hago cashuuraha oo qeexaya noocyada cashuuraha, wakhtiga ay waajibaan cashuurahu cidda ay ku waajibaan iyo cidda ka reeban oo leh chashuur-dhaaf sharci ah;

Markaan Ogaaday: In cashuur-dhaaf aan sharciga waafaqsanayn loo sameeyo alaabooyin iyo dad ajaanib ah oo ujeedo ganacsi leh kuwaasi oo xeerarka dalku ku waajibiyeen cashuur;

Markaan Garwasaday: In cashuur-dhaafka tirade badan ee aan sharciga waafaqsanayni uu ku keenayo hoos u dhac dhakhliga Dalka;

Markaan Helay: war-bixinta iyo talo-soo-jeedinta Wasaaradaha iyo hay'adaha Dawladda ee uu khuseeyo cashuur-dhaafku;

Waxaan Go'aamiyey;

- 1) In wasaaradaha iyo hay'adaha xukuumaddu aanay u samayn Karin cashuur-dhaaf aan shrci ahayn alaabooyinka sifo ganacsi dalka dalka loo keeno iyo

ajaanibka dalka u imanays ama ka haya hawl macaash doon ah.

- 2) In habka cashuur dhaafka alaabooyinka la soo dejiyo iyo cashuuraha kale ee barriga loo raaco sida ay dhigayaan qodobada 145aad, 136aad iyo 163aad ee Xeerka kastamada Somaliland Xeer Lr.73/2016, iyo qodobbda 6aad, 46aad iyo 72aad ee Xeerka cashuuraha Barriga Xeer Lr.72/2016, iyo heshiisyada shirkadaha maalgashiga caalamiga ah ee Somaliland qayb ka tahay.
- 3) In shirkadaha ganacsiga ee loo samaynayo cashuur-dhaafka kastamka si sharciga waafaqsan, laga soo xareeyo cashuuraha kale ee barriga ee ku waajibay, sida; cashuurta dakhliga (Income tax). Cashuurta iibka (sales Tax) cashuurta macaashka (profit Tax) iwm, si waafaqsan cutubyada 2aad, 3aad iyo 4aad ee Xeerka Cashuuraha Barriga Xeer Lr.72/2016. Sidoo kale, Hay'adaha qaramada midoobay, kuwa caalamiga iyo kuwa maxaliga ah in laga soo xereeyo cashuuraha barriga ee ku waajibay, marka laga reebo kuwa sharcigu ka dhaafay.
- 4) In Wasaaradda Horumarinta Maamliyaddu iyadoo la kaashanaysa hay'adaha kale ee dawladda, ay diyaariso habraacyada iyo xeer-nidaamiyayaasha lagu faah-faahinaayo, laguna hirgasho qodobbada iyo ujeedooyinka Xeerka kastamada iyo Xeerka cashuuraha Barriga, oo ay ku jirto cashuur-dhaafyada kala duwan ee xeerarka dalku dhigayaan, si waafaqsan qodobada 51aad, 52aad, 208aad iyo 246aad ee Xeerka cashuuraha bariga xeer Lr 72/2016 iyo qodobada 18aad 36aad 206aad ee Xeerka kastamada Somaliland Xeer Lr.73/2016.
- 5) In la sii wado dhiiri-gelinta wershadleyda dalka marka ay bilaabayaana dhismaha warshadaha, lana siiyo cashuur-dhaaf wixii agab ah; sida mishiinada iyo

qalabka-dayac-tirka, waxase shrci ah in ay ka sitaan wasaradda Ganacsiga, Wershadaha iyo Dalxiiska qoraal caddaynaya nooca wershadda ay la soo dagayaan, tirada qalabka dayac-tirka iyo dammaanad mujinaysa muddada ay ku kicinayaan wershadda.

- 6) In wershada raasamaalkeeda lacageed ku bilaabmo ugu yaraan \$250,000(Laba Boqol iyo Konton kun oo door), kana hawl-galaan ugu yaraan 30 shaqaale ah. laga dhaaf Cashuurata Soo –dejinta (Custom Import Duty).
- 7) In alaabta Qaydhin (Raw Meterial) ee warshadaha lo sameeyo cashuur- dhaaf saddexda sanno ee ugu horeeya, wixii ka danbeeya muddada seddxdada sanno ah waxa kuajibaysa cashuur alaabta qaydhin ee warshadaha. Waxa reeban in alaabta qaydhin ee warshaddu ku heshay cashuur-dhaaf loo iib geeyo suuqa, sidoo kale waa siyaasadda dawladda in la dhiiri-galiyo isticmaalka khayraadka iyo alaabta dalka gudihiisa laga heli karo, si loo maarmo in la soo dejiyo alaab qaydhin.
- 8) In Cashuuraha Barrigu ay ku shaqeeyaan Xeerka ay hore ugu dhaqan-galeen ee Xeerka Dakhliga cashuuraha Barriga Xeer Lr .72/2016. Sida darteed, go, aankan laga soo saaray cashuur-dhaafka warshaduhu ma khuseeyo cashuuraha berriga.
- 9) In wasaaradaha iyo hay'adaha xukuumaddu si mug leh uga qayb-qaataan ilaalinta iyo soo uruurinta cashuuraha, kana gacan siiyaan Wasaaradda Hormarinta Maaliyadda wajibaadkeeda la xidhiidha kobcinta dakhliga.

Allaa Mahad Leh

Muuse Biixi Cabdi
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

QAYBTA SHANAAD:
AMARADA, OGEYSIISYADA & QANDARAASYADA DOWLADA:

JAMHUURIYADDA



SOMALILAND



XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/460/2018.

19/08/2018

Hargeysa

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo: - Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, BASRA TRADING COM, Oo ay ku cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku cad qodobka 11aad (2) (a) Somaliland Company law.

Markuu Arkay: - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yahay Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland saamiyadooduna ay suganyihiin.

Markuu arkay: - Saxeexa saamilaydu Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.



Wuxuu Diiwaan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si Sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay, **BASRA TRADING COM Astaanteeduna tahay:-**(), shaqadeeduna tahay jumlad iibinta (Whole sale), xarunteeduna tahay Magaaladda Abdaal, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 31/07/2018

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

JAMHUURIYADDA  SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/461/2018.

19/08/2018

Hargeysa

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeedo: - Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, TOMOON Ltd, Oo ay ku cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku cad qodobka 11aad (2) (a) Somaliland Company law.

Markuu Arkay: - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay: - Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwaan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si Sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay **Tolmoon Ltd, Astaanteeduna tahay:** - (), shaqadeeduna tahay ICT (ICT), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeisa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 31/07/2018.

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/462/2018.

19/08/2018

Hargeysa

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeedo: - Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, GL GENERAL TRADING, Oo ay ku cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku cad qodobka 11aad (2) (a) Somaliland Company law.

Markuu Arkay: - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland, Saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay: - Saxeexa saamilaha Shirkaddu uu saxeexay sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwaan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si Sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay **GL GENERAL TRADING COMPANY, Astaanteeduna tahay:** - (), shaqadeeduna tahay so dajinta (import), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 31/07/2018

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka



XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL//2018.

8/08/2018

Hargeysa

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeedo: - Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, REXPAY PAYMENT GETWAY

COMPANY, oo ay ku cad yihiin xubnaha shirkaddu sida kucad godaabka 11aad (2) (a) Somaliland Company law



Markuu Arkay: - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland saamiyadooduna ay suganyihiin.

Markuu arkay: - Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwaan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si Sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay **REXPAY PAYMENT GETWAY COMPANY, Asteeduna taha:** - (Magaceeda oo baabsan), shaqadeeduna tahay ICT (ICT FIRM), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 08/08/2018

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/464/2018.

26/08/2018

Hargeysa

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeedo: - Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, FAIR LOGISTICS AND PROCUREMENT COMPANY, Oo ay ku cad yihiin xubnaha shirkaddu, sida kucad qodaobka 11aad (2) (a) Somaliland Company law

Markuu Arkay: - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay: - Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwaan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si Sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay FAIR LOGISTICS AND PROCUREMENT COMPANY, shaqadeeduna tahay gadiidinta iyo soo iibinta (procurement and logistics), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 26/08/2018

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

JAMHUURIYADDA  SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/465/2018.

26/08/2018

Hargeysa

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeedo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, MOBILE & TABLETS ELECTRONICS CAPACITY PVT LTD, oo ay ku cad yihiin xubnaha shirkadda sida ku cad qodobka 11aad (2) (a) Somaliland company law.

Markuu Arkay: - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay: - Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwaan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si Sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay **MOBILE & TABLETS ELECTRONIC CAPACITY PVT LTD:** - (shaqadeeduna tahay soo dejinta (Import), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 26/08/2018

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/466/2018.

26/08/2018



Hargeisa

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeedo: - Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, RED SEA LOGISTICS AND PROCUREMENT COMPANY, oo ay ku cad yihiin xubnaha shirkaddu, sida ku cad qodobka 11aad (2) (a) Somaliland company law.

Markuu Arkay: - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay: - Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwaan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si Sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay **RED SEA LOGISTICS AND PROCUREMENT COMPANY**, shaqadeeduna tahay Rarista iyo dajinta (procurement & Logistics), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargaysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 26/08/2018

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

JAMHUURIYADDA  **SOMALILAND**

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/467/2018.

26/08/2018

Hargeysa

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeedo: - Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, **DANSOOR GENERAL TRADING**

COMPANY, oo ay ku cad yihiin xubnaha shirkaddu, sida ku cad qodobka 11aad (2) (a) Somaliland company law.

Markuu Arkay: - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay: - Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwaan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si Sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay **DANSOOR GENERAL TRADING COMPANY**, shaqadeeduna tahay Dhoofin iyo soo dajinta alaabta (Import and Export), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargaysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 26/08/2018

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)


Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

JAMHUURIYADDA  SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/468/2017.

26/08/2018



Cidda Ay Khuseyso.

Ujeedo: - Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, **FUTURE ACCOUNTING & BUSINESS ADVISORS**, oo ay ku cad yihiin xubnaha shirkaddu, sida ku cad qodobka 11aad (2) (a) Somaliland company law.

Markuu Arkay: - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay: - Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwaan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si Sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay **FUTURE ACCOUNTING & BUSINESS ADVISORS**, shaqadeeduna tahay soo dejinta alaabta (accounting & business mangament),

xarunteeduna tahay Magaaladda Hargaysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 26/08/2018

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)



Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

JAMHUURIYADDA  SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/469/2018.

26/08/2018

Hargeysa

Ku: Cidda Ay Khuseyso.


Ujeedo: - Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

